

Hordhacii raysalwasaaraha markii lagu wareejinayey warbixintii guddiga koroonaha

Khudbad/hadal | Taariikh: 14.04.2021

Ka soo baxay: Raysalwasaare Erna Solberg

Hordhacii raysalwasaare Erna Solberg xilligii ku wareejinta warbixintii Guddiga koroonaha ee ka dhacday war-saxaafadeed lagu qabtay Xafiiska Raysalwasaraa, 14-kii Abriil 2021.

Dhammaantiin gacalayaal,

Ugu horreyn waxaan rabaa in aan guddiga uga mahadceliyo warbixinta iyo dedaalka ay sameeyeen. Waxa kale aan xoghayntana uga mahadcelinnayaa shaqada ay qabteen.

Waxa ay ahayd shaqo aan hawl yarayn, oo ka koobanayd su'aalo culus iyadoo isla markaana la haystay wakhti gaaban oo lagu soo celiyo jawaab.

Cudurka safmarka ah ee koroonadu waxa cawaaqib waaweyn kala kulmay dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada Norway. Marka sidaa loo eego tani waa xaalad adag oo ka duwan waxyaalihii hore inoo soo maray.

Markii ay ahayd 12-kii Maarso waxannu soo rognay tallaabooyinkii ugu adkaa ee Norway soo maray xilliyada nabadda ah. Waxannu gaadhay go'aammo uu walaac badan ku jiro. Waxannu mudnaanta koowaad siinay nafta iyo caafimaadka dadka, kaddibna si wadajir ah ayaynu ugu guulaysanay hakinta fayruska iyo xakamaynta faafitaanka cudurka.

Waxa jira mabda' muhiim ah oo la socda dhammaan hawlaha khuseeya heeganka oo ku saabsan in qiimayn lagu sameeyo wax kasta oo dhacay. Waa in baadhitaan lagu sameeyo dhammaan tababarada la sameeyey oo la eego waxa aynu ka baran karno. Qaabkaas ayaynu ku horumarin karnaa heeganka kuna xoojin karnaa ammaanka Norway. Waa wax hay'addaheena iyo annaga oo ah xukuumaddaba nagu waajib ah.

Inkastoo Norway ay cudur ahaan iyo dhaqaale ahaanba ka khasaare yarayd waddamo badan oo kale, haddana waa muhiim in la sameeyo qiimayn oo la hagaajiyo wixii cillado ah ee jira. Waayo: Hore inooma soo marin dhacdo sidan u baaxad weyn, oo muddo sidan u dheer socotay.

Abriil 2020 ayey xukuumaddu dejisay guddi madaxbannaan – wax aannu sidaa u yeelnay si baadhitaan iyo qiimayn qotodheer oo dhammaystiran loogu sameeyo qaabkii ay dawladdu u maaraysay cudurka koroonaha ee safmarka ah. Waxa la rabay in guddigu eego heegankii jiray safmarka hortii iyo qaabkii loo maareeyey xaaladdii adkayd.

Maxaa si wacan u shaqeeyey, maxaa laga gaabiyey? Maxaa si kale loo samayn karaa marka dambe? Waa in aynu wax ka barano xaaladdan adag ee lagu jiro, si aynu diyaar u ahaano marka dambe.

Maadaama weli lagu jiro xaaladda cudurka safmarka ah, waxa guddiga suurtaggal u noqon waayey in ay qiimeeyaan dhinac kasta oo ka mid ah qaabkii dawladdu wax u maaraysay.

Taas darteed waxa ay dawladdu rabtaa in guddigu sii wato shaqadiisa ilaa inta safmarku dhammaanayo. Waan ku faraxsanahay in ku dhawaad dhammaan xubnaha guddigu aqbaleen in ay sii hayaan xilalkooda. Waa arrin u wacan in aan hawshu kala go’ in.

Warbixinta guddiga koroonaha waxa hadda loo gudbinayaa dhegaysi guud, iyadoo wakhtiga lagaga soo jawaabi karo laga dhigayo mid suurtaggelinaya in warbixinta go’aan laga soo saari karo xagaaga ka hor.

Waxa kale oo aan rabaa in aan Stortinget ka codsado in aan toddobaadyada soo socda siiyo sharraxaad ku saabsan warbixinta.

Kaddib marka guddigu soo gudbiyo warbixinta, waxa xukuumaddu soo bandhigi doontaa soo-jeedin ku socota Stortinget oo ku saabsan sii ambaqaadista shaqadii guddigu qabtay.

Waxan mar kale guddiga uga mahadcelinayaa shaqadan muhiimka ah – oo ah shaqo gundhig u noqon doonta dooddo muhiim ah oo iman doonna, iyo qaabka loo sii hagaajin karo hawlaha heeganka iyo maareynta xaaladaha adag.

Waxa ay ahayd in aan hadda ku siiyo ubax mahadacelin ah. Laakiin maadaama aynu hadda ku dhex jirno cudur safmar ah, waxa adiga iyo xubnaha kale ee guddigaba hadhow ubaxyo loo siin doonnaa si waafaqsan ka hortagga cudurka. Markaa sidaa ku ogoow in uu soo socdo.

Intaas kaddib waxa aan hadalka ku wareejinayaa gudoomiyaha guddiga, barafasoor Stener Kvinnsland.